Kaaliyahaaga ee la degidda xaaskaaga

The Law Society

Hanashada mustaqbalkaaga

La degidda xaas aadan weli guursan ama la iibsashada guri ee xaas aadan weli guursan waxay noqon kartaa arrin xiiso badan leh. Illaase dad tiro yar ayaa fahmi karaa dhibaatada ay lahaan karto arrintaasi. Inkastoo ay u muuqato arrin xilligeedii la soo dhaafay, illaase waxaa xusid mudan in labada qof ee aan isguursan aysan xaq u lahayn sida marka ay isguursadaan. Ma jiro sharciga guurka ah. Nasiib darro, goorta dadka qaar ay fahmaan taasi, sida badan waxaa suurtowda in ay marayaan maraxalad aan waxba laga qaban karin – tusaale, haddii wada noolaashanshahii lagu heshiin waayey ama uu dhinto labda lammaane midkooda, waxaana markaasi dareemaan ama gartaan in aysan haysan sharci badbaadin kara.

Xaashidani waxaa kun qoran waxyaabaha aad u bahan tahay in aad ka sii fikirtid haddii aadan guursan qofka aad la nooshahay.

Waxaa muhiim ah in marka hore aad talobixin raadsatid inta aadan qofka kale la noolaan.

- waxyaabaha aad xaquuqda u leedahay;
- waxyaabaha adiga iyo qofka aad wada nooshihiin goor kasta idinka dhexeyn karo; iyo
- waxyaabaha aad sameyn kartid ee aad ku hanan kartid xaaladdaada.

Raadinta looyarka

Haddii aadan lahayn looyar, waxaad eegtaa boggeena intarneetka ee ah www.lawsociety.org.uk/findasolicitor kadibna waxaad ka sii dalacataa ‘Qoyska’ (Family) halkaasi oo aad ka heli doontid faafaahinta looyarrada ee xaafaddaada. Ama waxaad soo wacdaa ‘Law Society’ ee laga helo telefoonka 0870 606 2555.

Waxyaabaha uu looyarka kaaga baahn doono

Goorta looyar aad qabsatid, wuxuu kaaga baahan doonaa in aad siisid akhbaar buuxda ee ku saabsan xaaladdaada. Waxaa suurtowda in looyarka uu ku weydiyo akhbaar badan oo kala duwan. Taasi waxay noqon kartaa:

- faafaahinta taarikhda xiriirkiina;
- liiska hantidaada iyo midda qofka kale ee aad wada nooshiin;
- haddii guriga aad mukisid, muxuu yahay qiimaha guriga iyo magaca qofka ee uu ku qoran yahay;
- waxyaabaha aad adiga iyo qofka kale ka wada qabateen guriga (ayna ka mid tahay hawsha laga qabtay);
- qiimaha hantida kale;
- munshaarkaaga iyo munshaarka qofka kale; iyo
- haddii adiga ama xaaskaagu aad qabtaan carruur.

Markaa ad akahbaartaasi siisid looyarkaaga ayuu kuu sharxi doonaa waxyaabaha aad xaqa u leedahay. Wuxuu kuu sheegi doonaa meelaha ku saabsan lahaanshaha guriga ee ay halis ka imaan karto, kadibna wuxuu ku sheegi doonaa habka ugu wanaagsan ee aad kaga hortegi kartid arrintaasi.

Ogsoonow, looyarkaaga hal qof kelito ayuu wakiil ka noqon karaa ee labadiinuba wakiil idin kama noqon karo. Hataa haddii aad dooneysaan, looyarka ma matali karo danaha labadiinuba.

Waxyaabaha tixgelinta mudan

Halka waxaa ku qoran waxybaaha sharciga uu looyarkaaga kula eegi doono.

Mulkinta guriga

Haddii aad la degtid saaxib oo magaciisa ku qoran yahay guriga, sida badan xaq uma yeelan doontid lacagta ka soo baxdo haddii guriga la gado. Xaq uma yeelan doontid haddii aadan caddeyn karin:

- qayb ka bixin lacagta dhibaajiga guriga ama bixinta moorgejka; ama
- sameynta qorsho lacag bixin tusaale - shaqo dayactir ee muhiim ah) waayo waxay tuseysaa in uu jirey heshiiska in guriga aad qayb ku leedahay.

Xaq uma yeelan kartid haddii qofka aad la nooshaya uu guriga kaa saaro. Sidoo kale, xaq uma yeelan doontid guriga haddii uu xaaska aadan weli isguursan uu dhinto isagoon sameynin qoraal dardaaran ah ee uu guriga kugu magacaabayo. Haddii uusan ka tegin dardaaran qoraal ah waa in aad maxkammadda ka codsataa in guriga lagugu qoro.Waxaad taasi sameyn kartaa haddii aad wada nooleydeen laba sano ama ka badan ama haddii dhanka dhaqaale uu kaa taageerayey xaaska kaa dhintay.

Waxaa suurtowda in looyarkaaga uu kuugula taliyo in saaxibkaada guriga la wareejiyo oo magacaada loogu soo wareejiyo teenanti wada deggen ahaan (joint tenant) ama teenantiyo waxyaabo ka dhexeeyo (tenant in common). Haddii guriga aad isla iibateen waxaad xaq u yeelan doonytaa 50% marka guriga la gado. Sidoo kale haddii midkiina uu dinto, midka kale ayaa guriga si toos ah ula wareegi doonaa.

Haseyeeshee haddii guriga aad ku degganaeyd xiriirka aad la leedahay qofka kale, waxaad xaq u leedahay qaybtaada kelito. Marka aad tahaya teenant xiriir la leh qofka kale waxaad looyarkiina ka codsan kartaan in uu idin sameeyo lahaanshaha hantida (deed of trust) taasi oo qofka lagu qori doono qaybta uu doonayo. Waa in qoraalka dardaaranka lagu qoraa haddii guriga qofka kale uu qaadanayo haddii qofka kale uu geeriyoodo.

Wada ijaarashada

Haddii guriga aad wada ijaaraneysaan, aad bay muhiim u tahay in guriga lagu qoro labadiina magac.

Carruurta

Haddii xaaska aadan weli guursan aaad ilmo iisu dhali doontaan, waxaa muhiim ah in marka hore laga sii fikiro magaca ilmaha iyo akhbaarta lagu qori doono diwaanka dhalashada. Waa in labadiina aad ka heshiisaan magaca awowga ee ilmaha loo qori doono, haddii aad doontaan si wada jir ah ayaad magaciina ugu qori kartaan.

Sharciga wuxuu farayaa, haddii hooyada iyo aabbaha aysan is guursan, ilmaha waxaa si toos ah xaq ugu yeelan doonaa hooyada kelito. Laga billaabo 1 Dhiseembar 2003, haddii magaca aabbaha uu shahaadada dhalasaha ee ilmaha kula qoran yahay midka hooyada wuxuu xaq u leeyahay mas’uuliyadda ilmaha. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo uu looyarkiina idinka caawin doono waxaa habboon in aad wada gashaan qorsho ah in mas’uuliyadda ilmaha aad wadaagtaan.Taasina waxay waxtar lahaan doontaa haddii abbaha iyo hooyada ilmaha ay kala tagaan.

Haddii aad la nooshaay qof haysto ilmo uu qof kale usoo dhalay, marnaba sharciga kuma saarayo mas’uuliyadda ilmahaasi. Looyarkaaga ayaad akhbaar dheeraad ah ka heli doontaa.

Carruurta iyo sebereeshanka (Children and seperation)

Haddii adiga iyo qofka aad la nooshaya aad kala tagtaan idinkoo carruur iisu leh waxaad ka codsan kartaa Hay’adda Taageerada Carruurta (Child Support Agency) in maxkammadda ay kaaga soo go’aamiyaan daryeel dhaqaale ee la xiriira kharashka carruurta.Tanina waa in aad ka wareysataa looyarkaaga sida ugu dhaqsaha badan.

Xaaladda qofka kuugu xiga

Haddii xaaskaaga uu jirrado ama uu dhinto, laguuma aqoonsan doono in aad tahay qaraabada ugu xiga haddii adiga iyo saaxibka aad la nooshahay aadan sameysan qoraal heshiis ah. Looyarkaaga ayaa kaa caawin doonaa heshiiskaasi.

Kaaliyahaaga ee la degidda xaaskaaga

The Law Society

Bangiga

Haddii adiga iyo saaxibka aad wada nooshahiin aad kala leedihiin akawnti bangi oo kala duwan, marna laguuma oggolaan doono lacagta akawntiga qofka kale ee aad wada nooshahiin. Haddii uu saaxibka aad wada nooshahiin uu dhinto, hantida uu ka tago waa xoolahiisa. Marna qofka kale ma dhaxli doono xoolahaasi haddii aysan taasi ku qornayn dardaarankiisa.

Habka taasi looga bixi karo waa in aad wada leedihiin hal akawnti oo magaciina ku qoran yahay. Goorta uu dhinto qofka kale, akawntiga waxaa toos ula wareegi doonaa qofka ee soo haray.

Xaaladda canshuurta

Adiga iyo qofka aad wada nooshahiin ma heli doontaan daryeelka canshuurta ee dadka isqaba, siiba marka la eegayo canshuurta dakhliga iyo canshuurta dhaxlidda. Si aan la mid ahayn kuwa isqaba, waxaa suurtowad in canshuur dheeraad ah aad bixisd haddii aad dooneysid in hanti badan aad siisid qofka kale ee aad wada nooshahiin.

Barnaamijka beenshanka

Haddii ay geeri kugu timaaddo, si toos ah beenshankaaga laguma wareejin doono qofka aad wada nooshahiin. Shirkadaha kala duwan waxay leeyihiin qaynuuno kala duwan, aad bayna muhiim u tahay in arrintaada aad si wanaagsan ugala tashatid looyarkaaga si aad u ogaatid heerka beenshankaada iyo midka qofka kale ee aad wada nooshahiin.

Sameynta dardaaranka

Dardaaranka waa habka ugu wanaagsan ee aad ku kala saari lahayd hantida aad leedahay iyo midda xaaskaaga. Haddii aadan sameysan dardaaran, qofka aad wada nooshahiin, xaq uma yeelan doono hantidaada goorta ay geeri kugu timaaddo. Sidaasi awgeedna aad bay muhiim u tahay in aad dardaaran si qortid si qofka aad wada nooshahiin ama ilmahiisa uu u dhaxlo hantidaada.

Heshiiska wada noolaashaanha (Cohabitation contracts)

Tani waa fikrad dhowaan soo caanbaxday, illaase xawli yar ayuu ku socdaa aqoonsashada ee lagu xasilin karo dhaqaalaha labada qof ee wada nool iyo qorshooyinkooda mustaqbalka. Marka hore ayaa la qaxeeya waxyaabaha uu qof kasta xaq u leeyahay inta uu xiriirka jiro ama haddii ay kala tagaan ama haddii uu midkooda dhinto. Kaasi waa 'heshiis sharafeed' (honourable agreements) taasi oo macnaheedu yahay in qodob kasta aysan ansixin doonin maxkammadda. Taasi waxtarkeedu waa yareynta isqilaafka iyo abuuridda jawi xasiloon.

Adiga iyo qofka aad wada nooshahiin waa in aad raadsataan talobixin kala gaar ah inta aadan saxiixin heshiisyada noocaasi ah.

Isqilaafidda

Nasiib darro, badanka lamaaneyaasha wada nool kama raadsadaano talobixin ka hor inta xiriirkooda uusan burburin, qofka kale uusan dhiman ama inta aysan imaan mashaakillo kale. Aad bay u sahlan tahay sida loo xaliyo dhibaatooyinka mashaakillada marka la joogo marxaladdani, illaase ogsoonow, looyarkaaga ayaa aqoon u leh habka loo ilaaliyo danahaaga. Haddii ay noqon lahayd eegidda xaquuqdaada, ama dacwo adag oo ku saabsan haynta carruurta, looyarkaaga ayaa ku siin doonaa tallada habka ugu habboon ee sharciga ee lagu xallin karo dacwadaada.

Kharashka

Kharashyada looyarada wuu kala duwan yahay. Waxay ku xiran tahay:

- khibradda iyo aqoonta looyarka;
- nooca adeegga ee la qabto;
- haddii loo baahan yahay in la sameeyo heshiis.

Waxaa goor kasta habboon, inta aadan go'aansan looyarka aad isticmaali doontid in aad sii ogaatid kharashyada ay qaataan. Ogsoonow, qiimaha ay qaataan kelito kuma koobno muhiimadda. Waxaa kaloo muhiim ah in aad heshid looyar u dhega nugul arrintaada oo aad isfahmi kartaan.

Waxaa suurtowda in aad heshi kaalmo haddii uu hooseeyo dakhliga aad heshid ama aad qaadatid benifityada dowladda. Looyarkaaga ayaa kuu sheegi doonaa ahddii aad heli kartid kaalmada.

Akhbaar dheeraad ah

Tani waa mid ka mid ah xaashiyaha ku saabsan arrimaha adeegyada sharciga ee laga helo looyarrada. Hoos ayey ku qoran yihiin xaashiyaha kale. Waxaad ka heli kartaa looyarkaaga ama waxaad soo weci kartaa Xafiiska Sharciga Bulshada (Law Society) ee 0870 3333 084.

- Kaaliyahaaga ee sameynta dardaaranka
- Kaaliyahaaga ee iibsashada guriga
- Kaaliyahaaga ee sameynta furiinka
- Kaaliyahaaga ee dhibaatooyinka shaqada
- Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga
- Kaaliyahaaga ee sameynta codsiga magdhowga ee qofka
- Kaaliyahaaga arrimaha dhaqaale ee duqooshinka
- Kaaliyahaaga ee ijaaridda gurigaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaarashada guriga
- Kaaliyahaaga ee adeegsiga looyarka
- Kaaliyahaaga ee dardaaranka sharciyeed (probate)
- Kaaliyahaaga ee codsiga magangelyada

Waxaad heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran far waweyn, farta baraylka ee indhooleyaasha, iyadoo ku duuban cajaladda maqalka ama CD. Haddaad u baahan tahay mid ka mid ah kuwani, fadlan waxaad nagula soo xiriirtaa iimeylka accessibility@lawsociety.org.uk ama kala xoo xiriir telefoonka 0870 606 2555.

Waxaad kalood heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran luqado kala duwan. Waxaad ka daalacan kartaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk.

Lexcel

Look for Lexcel - the mark of excellence

The Law Society 113 Chancery Lane London WC2A 1PL Telefoonka: 020 7242 1222 www.lawsociety.org.uk

Inkastoo aanu ku dadaalnay tebinta akhbaar hufan, haddana ogsoonow, goor kasta qaynuunka iyo sharciga isbeddel ayaa lagu sameeyaa taasi oo qof kasta si gaar ah u saameyso. Xaashidani kuma saabsano akhbaar ama talobixinta shaqsiyaad gaar ah, sidaasi awgeedna mas'uul kama aanu nihin wixii dhibaato ah ee ka yimaaddo akhbaarta xaashidani.

Designed by dmlmarketing.co.uk Version 2, 2007 Your guide to setting up home with your partner – Somali